# *Baaqii Kigali ee ka Baabi'inta Xadgudubyadda Jinsiga Gudaha Warbaahinta Afrika Waqti kusiman 2034*

## *Hordhac*

Anaga, xubnaha, xulafada iyo la-hawlgalayaasha Haweenka Afrika ee Warbaahinta

Waxa aan aqoonsanahay in warbaahinta Afrika ay awood u leedahay in ey hagaan qaab tabinta sheekooyinka oo ay lawadaagaan dadweynaha. Sidaa darteed, Afrika qaarad ahaan waxa ey awoodaa in ey tabiso sheekooyinkeeda u gaarka ah isla markaasna ey horumariso aragtida ku salesan qaarad bilaa dhibaato ah.

Iyadoo walaac kajiro dhibaato-jinsiyeydka ka dhexjiro bulshada iyo in goobta shaqada ey maquuniso talaaboyinka lagu xaqijinayo jinsi sinaanta,

Iyadoo lagu baraarugsanyahay sii kororka falalka dhibaatooyinka wata, oo ay kamid yihiin xadgdubyadda galmo doonka ah, naag-dilka, dhaqamada xun xun, hanjabaadaha online iyo offline, dhibaataynta, dhaqdhaqaaq lasocoshada, cagajugleynta, olole sumcad dil ah, iyo falal kale oo badan oo xadgudub oo ku salaysan jinsiga, iyadoo la qoonsayahay jiritaanada isdiidan oo ay ka mid yihiin jinsiyadda. Qabiilka, qowmiyada, naafanimada, heerka qofku kajoogo bulshada dhaqaale ahaan, diin, iyo siyaasad ahaan,

Iyadoo la aqoonsanayo baahida degdega ah ee loo qabo mabaadi'da hagaya wadarka iyo warbaahinta macluumaadka tebinta xadgudubyada ku aadan jinsiyada, iyo si ku filan oo loola dagaalamo xadgudubyada ku aadan jinsiyada oo ay la kulmaan suxufiyiinta iyagoo gudanaya waajibaadkooda shaqo.

Anagoo og baahida loo qabo in "warbaahintu ay baarto saamaynta ay ku leedahay door-ka aragtiyada kordhiya dhiaatooyinka ku aadan jinsiyada iyo sinnaan la'aanta, iyo sida la iskugu gudbiyo inta uu jiro xeen daabka nolosha, iyo in ay qaadaan tallaabooyin lagu tirtirayo muqaal xumida iyadoo ujeedadu tahay helidda bulsho bilaa dhibaato ah" sida ku cad Baaqa Beijing 1995 iyo Platform for Action,

Iyadoo la aqoonsanyahay in ey jirto tebin la'aanta arimaha xasaasiga ah ee jinsiga ay saameyn daran ku yeelan karto baahida loo qabo in la dhiso bulsho siman oo caddaalad ah.

Iyadoo dib loo xasuusanayo ballanqaadyada iyo talooyinka ku jira kuwa badan oo siyaasado iyo sharciyo caalami ah oo ay ka mid yihiin: Heshiiskii 1979 ee Ciribtirka Dhammaan Noocyada Takoorka ee Haweenka; Baaqii 1993 ee ku saabsanaa ciribtirka xadgudubyada ka dhanka ah haweenka; Baaqii Beijing 1995 iyo Platform ee Waxqabadka; Axdiga ILO 190 kaas oo aqoonsanaya xaqa uu qof kasta u leeyahay 'Adduun shaqo oo ka madax bannaan dhibaatooyinka iyo dhibaataynta oo ay ku jiraan

kuwa jinsiga ku salaysan'; Ajendaha 2030 ee Horumarinta Joogtada ah; Hab-maamuuska 2003 ee Axdiga Afrika ee Xuquuqda Aadanaha iyo Dadweynaha ee Xuquuqda Haweenka Afrika, iyo; Qaraarka 522 ee Xadgudubyada Dijital ah ee ka dhanka ah Haweenka Afrika ee Guddiga Afrika ee Xuquuqda Aadanaha iyo Dadka,

Iyadoo la ogyahay kala duwanashaha siyaasadaha iyo shuruucda qaran ee dalalka kala duwan ee ku aadan baabi'inta xadgudubyada ku saleysan jinsiyada,

Iyadoo la xusayo talooyinka kor loogu qaadayo fekir xor ahaanta ee haweenka iyo ragga, iyo sidoo kale baabi'inta qaababka bandhigga warbaahinta ee dhaliya, soo jiidashada iyo caadiyeynta dhibaatooyinka, iyo dhiirigelinta kuwa mas'uulka ka ah macluumaadka warbaahinta si ay u dhistaan habraacyo xirfadeed iyo xeerar; sidoo kale doorka warbaahinta si ay dadka ugu wargaliyaan oo ay u baraan waxyaabaha sababa iyo saameynta ka dhalata dhibaatooyinka ka dhanka ah haweenka iyo kicinta doodaha dadweynaha ee mawduuca (Beijing Platform for Action. para.125 j),

Iyadoo dib loo xasuusanayo waxqabadyada kala duwan ee daneeyayaasha (oo ay ku jiraan nidaamyada warbaahinta qaranka iyo kuwa caalamiga ah, ururada aan dawliga ahayn iyo ururada mihnadlayaasha warbaahinta) si loo kordhiyo helitaanka iyo ka qaybgalka haweenka ee go'aan qaadashada iyo soo bandhigida aragtiyaha gudaha iyo warbaahinadda horay ujiray iyo kuwa cusub, iyo in kor loo qaado dheellitirnaanta iyo abuurida fekir aanan gooni u beegsanen haweenka warbaahinta.

Waxa aan ogsoonahay in haweenka ka shaqeeya warbaahinta, taas oo ah, dhammaan haweenka ka shaqeeya qaybta oo leh ama aan lahayn mushahar, kuwa xoru u shaqeeya iyo shaqaalaha aan rasmiga ahayn oo shaqeeya qandaraas la'aan, inta badan waxaa loo geystaa dhibaatooyin ku dhan ah jinsiyada marka ay shaqadooda gudanayaan, oo ey kasoo gaaraan dhibaatooyin eyka midtahay xadgudub galmo doon iyo dhibaateyn kasoo gaartaa goobta shaqada iyo bulshada dhexdeeda, hanjabaad, cagajugleyn iyo weerarro offline iyo online,

Waxa uu walaac kajiraa saamaynta ay dhibaatooyinka noocan ahi ku yeelanayaan ku raaxaysiga xuquuqdooda haweenka warbaahinta ee xorriyad hadalka iyo xaqa ay bulshadu u leedahay inay ogaadaan,

Waxaan si weyn ula soconaa gabood-fallada xun xun ee wajahaan dumarka ay waraysteen ama lagu soo bandhigo sheekooyinka warbaahinta ee ku saabsan tacadiyada jinsiyada loo geysto waxaana walaac laga muujinayaa dhibaatooyinka halista ah ee ay saxaafaddu u geysato gabdhaha iyo haweenka.

Ku dadaalidda in lasii xoojiyo doorka muhiimka ah ee haweenka ku jira ururada warbaahinta iyo shabakadaha ay ku leeyihiin si isbeddel looga sameeyo waxna looga qabto dhibatooyinka ay haweenku kala kulmaan warbaahinta.

Waxa aan direynaa Baaqa soo socda ee Ciribtirka Xadgudubyada Jinsiga ee ka jira Warbaahinta Afrika mudo kusiman 2034-ka, waxa aana ugu baaqaynaa mulkiilayaasha

warbaahinta, go'aamiyaasha warbaahinta, xirfadlayaasha warbaahinta, ururada warbaahinta, barayaasha warbaahinta, bulshada rayidka ah iyo cilmi-baarayaasha in ay hir geliyaan oo ay taageeraa baaqeena.

## *Fekradahha ugu Muhiimsan*

Takoorka ka dhanka ah haweenka waa "kala sooc kasta, oo lagu sooco ama lagu xadido ama si ka kedisan loola dhaqmo haweenka oo ey sabab u tahay dhedig ahanshahooda kuwaas oo ujeeddooyinkooda ama saameyntoodu ay wax u dhimaan ama baabi'iyaan aqoonsashadda haweenka” sida kucad Xeerka Maputo

Dhibaatooyinka ku saleeysan jinsiga (GBV) waa ku xadgudub xuquuqda bini’aadam taas oo si weyn saameen ugu yeelata gabdhaha iyo haweenka. Hab-maamuuska Maputo waxa uu ku qeexay xad-gudubyada ku salaysan jinsiga ee ka dhanka ah haweenka “dhammaan falalka lagula kaco haweenka kuwaas oo u geysta ama u keeni kara dhibaato jireed, mid galmo doon, mid maskaxeed iyo mid dhaqaale, iyo sida in loogu goodiyo in lagula kaco dhaqamadda nuucaas ama in lagu sameeyo xannibaadyo sharci darro ah oo lagu soo rogo ama laga qaado xorriyadaha aasaasiga ah ee nolosha gaarka ah ama nolosha guud ee wakhtiga nabadda iyo xaaladaha colaadaha hubaysan ama dagaaladda”.

Malo-aragtiyaddaha ku aadan jinsiga ayaa ah in si kale duwan loo kala suureeyo Labnimadda iyo dhedignimadda ayadoo lagu saleenayo xaalad dhaqameedka bulsho. Dhanka warbaahinta marki la eego, malo-aragtiyaddaha nuucaan ah waxa ey u muuqdaan kuwa aan si dhab ah u kala suureeneyn ragga iyo dumarka leh sifooyin la buunbuuniyey, kartiyo, door iyo hab dhaqan loo qoondeeyay ama laga kala filayo ragga iyo dumarka. Tusaaleyaasha waxaa kamid ah dumarka darenkooda galmo uu aad u sareeyo iyo ragga doorbida in ey dumarka u muujiyaan awoodooda raganimmo.

Isku-soo-beeganka takoorka iyo dhibateynta waa feker loogu kala sooco bulashada heeb ahaan, heer-nolol ahaan, iyo jinsi ahaan waana kuwa isku tolan oo isku xeran waxa eyna horseedaan abuuridda nidaam ku dhisan takoor iyo mudnaan siin. Fikradani waxa ey sharxeysaa in shaqsigu qof ahaantiisa ey u keeni karto faa’ido daro ama faa’ido. Waxa ey muujinaysaa baahida loo qabo in la fahmo sida ey iskugu xeranyihiin arimahan intii gooni gooni loo baari lahaa.

## *Mabaadi'da Baaqi Kigali*

1. SAXAAFAD KU DHISAN ANSHAX JINSI DHOOR: Warbaahintu waa in ey ka go'an tahay in lahelo saxaafad tayadeedu sareyso kuna dhisan xuquq bini'aadam oo kadhiidhisa xadgudubyadda jinsiga iyo ariamaha horseeda xadgudubyadda jinsiga.

2. WARBIXIN RUN AH, DHEELI TIRAN AANAN EEX LAHEYN: Suureenta warbaahinta iyo matalaadda ka badbaadayaasha iyo dhibanayaasha xadgudubyadda ka dhanka ah jinsiga waa in ey kudhisnaadaan xirfad, cadaalad, kuwa sax ah yihiin, dheelitiran, aan eex laheyn, xor ka ah malo-aragtiyaddaha kuna dhisan dhooridda xuquuqda sharafka bini'aadamka.

3. TEBBIN AAN TAKOOR HALEYN: Hey'adaha warbaahintu waa inay kordhiyaan anshax tebinta dhammaan noocyada xadgudubyada jinsiga ee ka dhanka ah dhaman haweenka iyo gabdhaha iyada oo aan loo eegin qowmiyad ahaan, heerkooda dhaqaale, heebtooda, awoodooda iyo kala soocidaha kale.

4. SIYAASADAHA IYO TABABARKA: Hey'adaha warbaahinta iyo dhammaan xubnaha kale waa in ay dejiyaan oo dhaqan geliyaan siyaasado, habraacyo iyo hageyaasha hab-dhaqanka qolka wararka iyo tabinta warbixinadda ku aadan xadgudubyadda ka dhanka ah haweenka iyo gabdhaha. Waa in ay bixiyaan tababaro si ay u kobciyaan dhaqan gelin macno leh iyo la socodka hageyaasha loo dejiyay.

5. TALAABO IN LA QAADO: Hey'adaha warbaahinta, ururadda, midowyada iyo macaahidda tababarka saxafiyiinta waa in ay cambaareeyaan, oo ay wax ka qabtaan oo ayna la dagaalamaan xadgudubyadda galmo doonka ah iyo noocyada kale ee xadgudubyadda ka dhanka ah haweenka iyo gabdhaha ee goobaha shaqada iyo online.

# Firqadda 1 aad. Talaabooyinka ugu Yaryar ee Hey'adaha Warbaahinta

- <u>1.1 Iney ka go'antahay xaqiijinta in si tayo sareyso looga warbixiyo GBV</u>
  - 1.1.1 In loo sameeyo habraacyo haga sidi looga warbixin lahaa GBV si anshax ah, cadaalad ah, dheelitiran, si sax ah, aanan ku saleysnen hab malo-aragti ah
  - 1.1.2. In sheekooyinka diiradda lagu saaro waayaha nolosha haweenka ay sidda tooska ah u saameeyeen GBV
  - 1.1.3. In laxaqiijiyo in si qoto dheer loo baadho warbixinta iyo saxaafaddda baadha mawduucyada la xidhiidha GBV ee kadhex jira bulshada iyo weliba dhanka warbaahinta
  - 1.1.4. In lagala kaashado haweenka bulshada rayidka ah iyo kuwa daneeya in ay la socdaan dhacdooyinka xadgudubyada ka dhanka ah jinsiga si loogaga faa'ideysto dejinta xogaha iyo ra'yiga quburadda ee ku aadan mowduuca.
  - 1.1.5. In lagusoo daro habab wax beddelka saxaafad ku dhisan xal uhelidda, mid sii jirta iyo saxaafad kudhisan anshax
  - 1.1.6. In si joogto ah loogu tababaro dhammaan shaqaalaha qolka wararka in si anshaxeesan uga warbixiyaan GBV.
  - 1.1.7. In laga dhex sameeyo hey'adaha warbaahinta qeyb ku howlan arimaha jinsiga
  - 1.1.8. In wada kaashi lagala sameeyo qoobaha waxbarashada cilmibaarista
  - 1.1.9. In diiradda lasaaro sheekooyinka guulesta si waxlooga qabto GBV looguna kordhiyo fahamka dadka arimahan oo ey denbiilayaashu bedeli karaan

- <u>1.2.  Iney kago'antahay in la tirtiro dhamaan noocyada GBV iyo takoorka goobaha shaqadda</u>
  - 1.2.1. In loo sameeyo oo islamarkaana la dhaqangeliyo soo gudbin warbixin dhexdhexaad ah oo daah-furan iyo in wax laga bedelo hababka xadgudubyada jinsiga, oo ay kamid yihiin xadgudubyada galmo doonka ah iyo kuwa goobaha shaqadda
  - 1.2.2. In loo sameeyo qaabab dabagal oo sahlan iyo habab sahlan oo dib u eegis loogu sameeyo GBV

- 1.2.3. In loo sameeyo siyaasado lagula tacaalo arimaha xasaasiga ah ee jinsiga ee ku aadan xadgudubyadda galmo doonka ah iyo takoorka
- 1.2.4. In loo sameeyo siyaasado oo ey ku cadyihiin ciqaabaha dembiilayaasha kukaca xadgudub galmo doon iyo dhammaan noocyada kale ee GBV ee kadhaca goobaha shaqadda
- 1.2.5. In laxaqiijiyo matalaad ahaanshiyaha kooxaha kashaqeenaya dejinta siyaasadaha iyo warbixinadda iyo in dib loo eego hababka loo marayo
- 1.2.6. In la ilaaliyo kuwa ka badbaada GBV ee jooga goobta shaqadda oona lasiiyo taageero bulsho iyo mid maskax ahaanba
- 1.2.7. In laxaqiijiyo in dhamaan shaqaalaha tababar lagu siiyo siyaasadaha iyo hababka looga hortago xadgudubka kadhan ka ah jinsiga ee kadhaca gudaha goobaha shaqadda
- 1.2.8. In loo dejiyo siyaasad dhiiri gelisa soo gudbinta arimaha GBV
- 1.2.9. Inee ka go’antahay abuuridda goob shaqo aan cidna halis ku aheyn oo cid waliba ku dareento amaan
- 1.2.10. In laxaqiijiyo in hogaanka si siman ey uga muuqato matalaada jinsiga
- 1.2.11. In meesha laga saaro in mushaaraadka loogu kala bato jinsi ahaan iyo in jinsi ahaan loogu kala eexdo xirfadda shaqo
- 1.2.12. Iney ka go’antahay sameenta daba galyo xilayadeesan, iyadoo lala kaashanayo ururada bulshada rayidka ah iyo hogaamiyayaasha, iyadoo loo eegayo waxtar ahaanshaha siyaasadaha GBV iyo sidoo kale warbixinadda iyo in dib loo eego hababka falalka la xiriira xadgudubyada gamlo doonka ah iyo xadgudubka ka dhanka ah dumarka ee goobta shaqadda.

- <u>1.3 Dhisidda Hogamiyaal Dumar ah</u>
  - 1.3.1.In loo sameeyo barnaamijyo latalin ee lagu taageerayo xirfadda shaqo ee dumarka looguna diyarinayo jagooyinka hogaamineed
- <u>1.4 Isla socodka iyo isla xisaabtanka</u>
  - 1.4.1. In lagala kaashaddo bulshada rayidka ah iyo daneeyayaasha teknoolojiyadda kawar qabka wax soo saarka warbaahinta ee ku aadan xadgudubyada ka dhanka ah jinsiga si loogaga faa’ideysto dejinta siyaasadaha iyo haraacyadda
  - 1.4.2. In lagala kaashado bulshada rayidka ah si loola socdo falalka fara xumeynta ee lagula kaco haweenka warbaahinta goobta shaqada si loogaga faa’ideysto talaabooyinka iyo siyasadaha hey’adeyd
  - 1.4.3. In loo sameeyo balanqaad hufan oo looga hortago oo isla markaana lagula latacaalo xadgudubyadda jinsiga
  - 1.4.4. In loo sameeyo halbeegyo iyo habab wax lagula socdo oo ey kamidyihin hab lasocodka Hogaansanaanta madaxa banaan oo leh waajibaadyada warbixinta sannadlaha ah
  - 1.4.5. In la sameeyo habab isla xisaabtan sida guddi talo bixin oo madax bannaan
  - 1.4.6. In la diiwaan geliyo heerka dhaqan gelinta talaabooyinka kuhabon si ey u noqoto tixraac mustaqbalka oo loogu adeegsado dabagalka.

- 1.4.7. In lagu cadaadiyo ururada in ey u baahnaadaan siyaasadaha u hogaan sanaanta jinsiga oo ay ka midyihiin siyaasadaha looga soo horjeedo xadgudubyadda galmo doonka ah iyo arimaha lidka ku ah GBV

## Firqadda 2 aad. Talaaboyinka ugu Yaryar ee ururada warbaahinta, midowyadda iyo shabakadaha

2.1. In ey ka go’antahay in lagu saleeyo xirfad maareynta GBV hey’addaha xubnaha ka ah, suxufiyiinta gaarka ah iyo kuwa xogaha soo saara

2.1.1. In sare loo qaado awooda howlwadeenadda iyadoo lasiinayo tababaro iyo agab oo ey u isticmaalaan warbixinta iyo soo saaridda xogaha ku aadan GBV oo kudhisan hab anshax jinsi leh

2.1.2. In loo dhiso, isla markaana la dhiirigeliyo sameynta iyo la socodka hirgelinta hab-raacyo si anshax ah looga warbixinayo xadgududyadda ka dhanka ah jinsiga

2.2  In ey ka go’antahay ka baabi’inta GBV warbaahinta oo idil

2.2.1. In midow weliba iyo urur weliba loo dejiyo laguna dhaqmo siyaasad jinsi dhoor

2.2.2. In loo dejiyo habab looga warbixiyo xadgudubyadda ka dhanka ah jinsiga ee kadhaca goobta shaqadda iyo xoghayayaasha ururadda

2.2.3. In loo sameeyo xil shaqaale gaar u ah ama loo magacaabo kuwa ka dhiidhiya xadgudubyadda oo mas’uuliyadoodu tahay in ey kormeeraan dhaqan gelinta siyaasadaha. In loo sameeyo hab warbixin oo labo heerle’ ah

2.2.4. Ururadda warbaahinta waxaa looga bahanyahay in ey si sanadle’ ah uga soo warbixiyaan heerka u hogaansanaashaha siyaasadaha jinsiga, kuwa ka dhanka ah xadgudubyadda galmo doonka ah iyo weliba kuwa ka dhanka ah GBV

2.3. Isla socodka iyo isla xisaabtanka

2.3.1. In lagala kaashado daneeyayaasha bulshada rayidka la socodka dhacdooyinka xadguduyadda ka dhanka ah jinsiga si loogaga faa’ideysto siyaasadda iyo talaabooyinka.

# Firqadda 3 aad. Talaabooyinka ugu Yar yar ee suxufiyiinta iyo kuwa kale ee soo saara xogaha

- 3.1 Siyaasadda Hogaansanaanta
    - 3.1.1. In loo hogaansamo hay'adaha ama siyaasadaha tifaftirka jinsiga ee kudhisan anshaxa iyo habraacyadda warbixinta
- 3.2.Xirfadda Saxaafadda
    - 3.2.1. In la raadiyo sidi hormar xirfad looga sameen lahaa uga warbixinta GBV si anshax leh si markaa loo xirfadeeyo kudhaqankeeda oo sare loogu qaado wacyiga dadweynaha isla markaana loo gaaro dhagestayaal hor leh.
    - 3.2.2. In ey ka go’antahay in lagasoo saaro GBV xog xasaasi ah jinsi ahaan si tayo sare leh
    - 3.2.3. In loogala kaashado kooxaha bulshada rayidka haweenka si loo helo rayi’gooda khibradda ku dhisan eeku aadan mowduuca.
    - 3.2.4. In ey ka go’antahay sidi suurad wanaagsan looga bixin lahaa kuwa ka badbaaday iyo kuwa u dhibanba si anshax ah, cadaalad ah, dheeli tiran, oo ka madax bannaan malo-aragtiyadda ka dhanka ah jinsiga
    - 3.2.5. In ey ka go'antahay in laga fogaado dhammaan qaab u suureynta dumarka ee ka tirsan nuucyadda kala duwan ee warbaahinta
    - 3.2.6. In ey ka go'antahay in laga fogaado dhammaan qaab u suureynta liideesa dumarka ka tirsan nuucyadda kala duwan ee warbaahinta
    - 3.2.7. In dib loo daba galo sheekoyinka hore loo shaaciyay si ey dadweynuhu weli uga warhayaan iyada oo ujeedku yahay sidi ey wax ugu biirin lahaayen baabi’inta GBV

## Firqadda 4 aad. Talaabooyinka ugu Yaryar ee Macaahida bixiya tababaradda saxaafadda, Barayaasha iyo cimlibaarayaasha warbaahinta

- 4.1. Manaahijta iyo ajandayaasha cilmibaarista
- 4.1.1. In loo dejiyo manaahij kudhisan jinsi dhoor (si guud)
- 4.1.2. In sare loo qaado awooda barayaasha mowduuca
- 4.1.3. In la kordhiyo tiradda barayaasha dumarka ah ee macaahida
- 4.1.4. In loogu dhigo mawduuc ku saabsan warbixinta anshaxa jinsiga ee GBV mid kamid ah cutubyada koorsooyinka aasaasiga ah ee saxaafadda, warbaahinta iyo barnaamijyada barashada isgaarsiinta.
- 4.1.5. In lagu dhiiri geliyo ardayda iyo cilmibaarayaasha kale in eyku sameeyaan daraasado madax-bannaan arimaha aana cilmi baaris badan laga sameynin ee laxiriira GBV dhanka warbaahinta iyo saxaafadda.
- 4.1.6. In lagala kaashado bulshada rayidka ah si loo dhiso inta cilmi ahaan laga yaqaano GBV ee kajira gudaha warbaahinta, iyadoo la adeegsanayo la socodka xogta iyo hababka kale. In loo isticmaalo natiijooyinka sidii wax loogu biirin lahaa isbedelka dhaqanka warbaahinta
- 4.2. Awooda Hey'adeed
- 4.2.1. In loo dejiyo siyaasado jinsi gudaha (goobta shaqada) iyo siyaasado gaar ah oo wax looga qabto xadgudubyadda galmo doonka ah ee kadhaca jaamacadaha
- 4.2.2. In loo sameeyo qalab lagula socdo isla markaana lagu qiimeeyo sida kaarka dhibcaha ama barometer si loo cabbiro waxqabadka qolalka wararka.
- 4.3. Isla socodka iyo isla xisaabtanka
- 4.3.1. In lagala kaashado bulshada rayidka ah si loo dhiso inta cilmi ahaan laga yaqaano GBV ee kajira gudaha warbaahinta, iyadoo la adeegsanayo la socodka xogta iyo hababka kale. In loo isticmaalo natiijooyinka sidii wax loogu biirin lahaa isbedelka dhaqanka warbaahinta

# Firqadda 5 aad. Talaabooyinka ugu Yaryar ee Hey’adaha Horumarinta Warbaahinta iyo Maalgeliyayaasha

- 5.1. Deeqaha iyo Maalgelinta
- 5.1.1. In la maalgeliyo oo lasiiyo taageero farsamo daneyayaasha bulshada rayidka ah oo ka shaqeenaya ka baabi’inta GBV gudaha warbaahinta
- 5.1.2. In lagasiiyo taageero maaliyad kooxaha la socodka warbaahinta iyo kormeerayaasha daraaseenta si ay ula socdaan baahinta warbaahinta ee arimaha GBV
- 5.1.3. In lagu bixiyo maalgelin aan xadid laheyn taageerida badqabnaanta iyo caafimad qabka maskax ahaan ee xirfadlayaasha
- 5.1.4. In lagusiiyo deeqo macaahida tababaradda iyo waxbarashadda in ey si gaar ah cilmi baaris ugu sameeyaan mowduucyadda aan cilmi baaris badan lagu sameenin
- 5.1.5. In lagu dhiiri geliyo oo lagu taageero deeq helayaasha in ey dhaqan geliyaan baaqa
- 5.2. Taageero Farsamo
- 5.2.1. In laga taagero ururada io hey’adaha warbahinta in ey dejiyaan isla markaasna ey dhaqangeliyaan oo ay la socdaan dhaqangelinta habraacyadda tafaftir iyo siyaasadaha macaahida ee ku aadan GBV
- 5.2.2. In laga taageero hindisayaasha warbaahinta mid bulsho, mid deegaan, mid qaran iyo mid gobol sidi ey u abuuri lahaayeen wacyigelin ku aadan GBV goobaha ay ka hawlgalaan iyo kuwa ka baxsanba
- 5.2.3. In laga taageero hey’adaha warbaahinta sahamada lagu qiimeenayo horumaradda ey sameeyeen iyo dib u milicsiga wayihii laso maray
- 5.2.4. In lamuujiyo hogaan ey ku dheehantahay kafiirsasho, iyadoo loo dejinayo heerar looga hortago GBV
- 5.3. Isla socodka iyo isla xisaabtanka
- 5.3.1. In lagala kaashado dhamaan daneeyayaasha sidi loola socon lahaa halka ey mareyso xirfadeynta qaabka looga maareeyo GBV goobaha shaqadda warbaahinta

iyo xogta lasoo saarayo. In lagala kaashado daneyayaasha si wax loogu kodhiyo meelaha ey wax ka maqanyihiin

## Firqadda 6 aad. Talaabooyinka ugu Yaryar ee Aaladaha dhijitaalka ah iyo Baraha Bulshada

- 6.1. Heerarka Habraacyada Bulshada iyo Aaladaha
- 6.1.1. In laxoojiyo habraacyada si loola dagaalamo oo wax looga qabto xadgudubyadda galmo doonka ah, dumar naceybka iyo dhammaan noocyada kale ee xadgudubyada jinsiga ee ka dhanka ah haweenka iyo gabdhaha ee kadhaca dhamaan aaladaha eynu isticmaalno
- 6.1.2. In lamaalgeliyo agab dib loogu eego xogaha oo isla markaasna labadiyo luuqadaha gudaha ee lagu qorayo
- 6.1.3. In laqiimeeyo geedi socodyadda iyo codsiyadda si loo ogaado oo isla markaasna wax looga qabto arimaha taagan ee la xiriira xuquuqul insaanka iyadoo lagu asteenayo qaab dhismeedka qiimeenta halisyadda xuquuqaha bini'aadamka ee UNESCO
- 6.1.4. In loo sameeyo habab iyadoo lagala kaashanayo suxufiyiinta iyo CSOs ka si wax loogaga qabto arimaha GBV ee kadhaca aaladaha eynu isticmalno
- 6.2. Awood-dhisidda iyo Ololaha
- 6.2.1. In labilaabo ama la taageero ololadda, tababarada iyo dadaallada kale ee ujeed koodu yahay in lagaaro dhammaan isticmaalayaasha si wax looga qabto arimaha GBV ee kadhaca aaladaha eynu isticmaalno
- 6.3. Deeqaha iyo Maalgelinta
- 6.3.1. In laga siiyo taageero maaliyadeed ururada bulshada rayidka ah ee ku hawlan dadaallada lagu baabi'nayo GBV kadhaca internetka.
- 6.4. Isla socodka iyo isla xisaabtanka
- 6.4.1. In xaqiijiyo daah-furnaanta talaabooyinka laqaadayo oo isla markaasna waafaqsan habraacyadda iyo heerarka kala duwan.
- 6.4.2. In la taageero dadaallada lagu dhisayo agab ama aalad bini'aadamku uyahay udub dhexaad oo lagaga baabi'inayo GBV goobaha iyo aaladaha kala duwan oo eynu isticmaalno.

- 6.4.3. In lagala kaashado ururada bulshada rayidka ah si ay ula socdaan oo ay wax uga qabtaan arimaha GBV ee kadhaca goobaha iyo aaladaha kala duwan oo eynu isticmaalno
- 6.4.4. In la sameeyo habab iskaashi lagula yeesho shirkadaha kale ee dhijitaalka ah si loola socdo oo isla markaasna wax looga qabto GBV kadhaca dhammaan goobaha iyo aaladaha kala duwan oo eynu isticmaalno.
- 6.4.5. In loo dejiyo habab looga soo warbixiyo oo isla markaasna ladedejiyo in laga saaro xogaha kadhanka ah GBV ee laguso gudbiyo aaladaha kala duwan ee internetka.

## Firqadda 7 aad. Talaabooyinka ugu Yaryar ee Maamulayaasha

- 7.1. In ey ka go'antahay in loo helo siyaasado haga oo si adag loo dhaqan geliyo, oo kudhisan cadaalad isla markaasna waxgal ah si looga hortago arimaha GBV iyo xadgudubyadda galmo doonka ah ee ka dhex dhaca warbaahinta iyo goobaha shaqadda.
- 7.2. In ey ka go'antahay in baaritan lagu sameeyo waxtar ahanshiyaha siyaasadaha uga degsan warbaahinta arimaha GBV iyo habraacyadda xadgudubyadda galmo doonka ah ee goobaha shaqadda.
- 7.3. In ladhaqan geliyo xayiraadyo lasaarayo hey'addaha warbaahinta kuwooda aan u hogaansamin iyadoo la eegayo sida ey udhaqan geliyeen siyaasadaha ka dhanka ah GBV iyo xadgudubyadda galmo doonka ah iyo habraacyadda goobta shaqada ee warbaahinta